



## Ujeedo: Waxbarashada Waqtiga Lagu Jiro Iskaarintimeynta ama Iskaliyeynta

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Iyadoo aynu ognahay in ardaydu ay u baahanayaan inay iskaarintimeeyaan iyo/ama iskaliyeeyaan sababto ah waxa suurtagal ah inay qaadeen xanuunka COVID-19, waxaan rabnaa inaan ku siino adiga iyo ardaygaaga tilmaamo cad iyo agab aan u diyaarinay macallimiinta, iskuulada iyo qoyskaaga si uu ardaygaagu u sii wato waxbarashadiisii isaga oo jooga guriga haddii loo baahdo.

Waxaan sii wadaynaa inaan u mahadcelino macallimiinteena Dugsiyada Dadweynaha Portland, kuwaasi oo shaqada yimaada sidii ay arday kasta u siin lahaayeen addeegiisa waxbarasho iyo iyada oo sidoo kale aan uga mahadcelineyno dabacsanaantooda ay muujiyeen xilligan adag ee aan ku jirno oo aynu ka baaran dageyno sidii aynu uga bixi lahayn. Iyada oo aan wali sii wadno wada hadaladii aan la lahayn Ururka Macallimiinta Portland, sidii aan u dhammeystiri lahayn faahfaahinta qorshe dhammeystiran, waxaan rajeyneynaa agabyadan soo socda iyo tilmaamaha aan siinay iskuuladu inay kaa caawin doonaan waxbarashada ardaygaaga inta uu ka maqan yahay fasalada waxbarashadiisa.

### Bogga Agabka Waxbarashada Ardayda K-8

Waxaan aburnay [PPS.net/AtHomeLearning](https://www.pps.net/AtHomeLearning), oo ah bog agab loogu talagalay inay macallimiinta PPS ay siiyaan K-8 ee hawlaha waxbarashada oo ah hab aad u fudud kuna haboon da'dooda iyo nuxurka casharada la siinayo ardayda haddii loo baahdo inay joogaan guriga. Ardayda dhigata Dugsiyada Sarre waxaa la siin doonaa waxbarasho gaar ah oo ay siinayaan macallimiintooda lagana siinayo iyada oo loo soo marinayo habka Canvas Platform.

### Tilmaamaha Macallimiinta

Macallimiinta waxaan siinay saddex tilmaamood oo ikhtiyaari ah, kuwaasi oo ay kala dooranayaan iyaga oo ku salaynaya sida ay marba suurtagal u tahay iyo sida ay u fudud tahay inay siiyaan ardayda addeegii waxbarasho ee ay u baahnaayeen:

- A. In la siiyo ama la qabatimo casharada bogga agabka ee ardayda kuwaasi oo ah ardayda iskaarintimeysay/ama iskaliyeysay sida looga baahan yahay inay ka soo shaqeyaan laylisyada casharada.
- B. In la siiyo ardayda casharo waxbarasho gaar ah oo fasalku leeyahay iyo in ardayga laga taageero iyada oo la marinayo habka la yiraa Seesaw iyo Canvas platform, hababkani oo ay ardaydu ay ka heli karaan marka ay tagaan halkan [PPS.net/student](https://www.pps.net/student)
- C. Ardayda rabta inay ka qeybqaataan casharada ka socda fasaladooda ay ka soo maqan yihiin inta ay ku jiraan iskaarintimeynta/iskaliyeyntu waa inay abuuraan habka loo galo muuq-baahiyaasha (iyada oo la tagaya Google Meet ama Zoom) si waxbarashada ka socota fasaladoodii ee macallimiintoodu dhigayaan isla waqtigaasi ula qaataan.



Haddii lagu sheegay inaad iskaliyeyso iyo/ama iskaarintimeyso, macallimiintaadu waxay ku siin doonaa macluumaad dheeraad ah oo ah habka kuu fiican inaad doorato fasalka, kuwaasi oo ay ka mid yihiin casharada shardigu ku xidhan yahay inaad qaadato.

**Imaanshaha/Maqnaashaha Ardayda Loo Sheegay Inay Iskaarintimeeyey/Iskaliyeyey**

Haddii ardaygaaga la weydiisto inuu iskaarintimeeyo iyo/ama iskaliyeyyo sababtoo ah xanuunka COVID-19, ardaygaaga waxaa la calaamadin doonaa inuu iskuulka ka maqan yahay sababo caafimaad awgood. In ardaygaaga la calaamadiyo inuu iskuulka joogo, waa in ardaygaagu uu dhammeeyaa laylisyadii casharada ee maalintaasi ardaydu fasalka ku qaadaneysay.

Waxaan idinka mahadcelineynaa dulqaadkiina iyo fahamkiina iyada oo aan sii wadayno horumarinta iyo dhisida awoodeena addeegyada ardaydeena iyo macallimiinteena.

Waad mahadsan tiihin,

**Dr. Shawn Bird**

Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada, Bulshada Dugsiyada iyo Casharada